

Talaalka Hepatitis B ee caruurta dhalata

Talaalkan waxa loogu talo galay caruurta hooyooyinkood sitaan(carrier) hepatitis B.

Waa maxay hepatitis B-gu?

Hepatitis B-gu waa xanuun ku dhaca beerka. Waxa dhaliya virus(jeermis xanuunka dhaliya). Badi dadka uu ku dhaco hepatitis B-gu way ka bogsadaan. Dadka qaar ayuu ku jiraa cudurku waxaana la yidhaahdaa carriers.

Carriers-ku way u gudbin karaan xanuunka dadka kale. Waxa kale oo ay qaadi karaan beer xanuun ama kansarka beerka.

Wax yeelo ma u leeyahay hepatitis B-gu ilmahayga dhashay?

Haa. Hooyooyinka carriers-ka ahi waxa ay qaad siin karaan ilmaha marka uu dhalanayo oo isaguna noqon kara carrier. Dhakhaatiirta Ontario waxay dhamaan dumarka uurka leh ka baadhaan hepatitis B. Haddii aad tahay carrier, talaal ayaa ilmahaaga ka badbaadin kara xanuunka.

Goorma ayaa ilmahayga la siin talaalka hepatitis B?

Haddii aad tahay carrier ilmahaaga waa la talaali marka uu dhasho, marka uu bil jirona talaalka labaad ayaa la siin. Ka saddexaad waxa la siin marka uu lix bilood jiro. Talaal khaas ah oo la yidhaahdo immune globulin ayaa la siin marka uu dhasho.

Ilaa xad intee le-eg ayuu talaalka hepatitis B difaaci karaa ilmahayga?

Caruurta qaadata saddexda talaalba 10-kiiba sagaal ayaa ka bad-baada. Marka la siiyo talaalka u dambeeya, dhakhtarkaaga waydii in uu dhiig ka qaado ilmahaaga. Baadhistani waxay tusaysaa sida uu talaalku u shaqaynayo.

Dhibaato miyaa lagala kulmaa talaalka hepatitis B?

Haa. Caruurta qaar ayaa xanuun yar yeelan kara, barar ama meesha laga muday oo casaata. Qayb yar ayaa yeelata xumad khafiif ah ama calool xanuun. **Waa inaad had iyo goor dhakhtarkaaga ka waraysato dhibaatooyinka iyo faa'idooyinka talaalkasta.**

Goorma ayaan dhakhtarkayga la hadlaa?

Markaaba la hadal dhakhtarkaaga haddii ilmahaagu talaalka kadib:

- neeftu qabato
- yeesho nabaro bararsan oo cun-cun leh
- afka ama wejigu uu bararo
- yeesho xumad (kor u dhaafta 40 C ama 104 F)

Qoyskayga inta kale ma qaadi karaan hepatitis B?

Haa. Haddii aad tahay carrier, nin-kaaga ama naag-taadu way u baahan yihiin talaal. Dadka kale ee kula deganina laga yaabaa inay u baahan-yihiin. Talaalku wuxuu ka hor tegayaa in ay caruurta, dhalinyarada iyo waayeelekuba qaadaan hepatitis B.

Maxaan yeelayaa haddii aan su'aalo kale ka qabo hepatitis B-ga?

La hadal dhakhtarkaaga ama, la xidhiidh xarunta caafimaadka kuugu dhow.

Diiwaan gelinta talaalada

Kadib marka ilmahaaga la talaalo, hubi in dhakhtarku "kaadhka jaalaha" ah ku diiwaan geliyo talaalka. Meel adag dhig.